# Talobixinta ka timi DAC ee ku saabsan cidhibtirka Isticmaalka Galmada dhiig miirashada ah, Xadgudubka, iyo Dhibaateynta taas oo Iskaashiga Horumarinta iyo Gargaarka Bani'aadamnimada: Tiirarka Muhiimka ah ee Ka Hortagga iyo Waxqabadka

**OECD Legal Instruments**

OECD
BETTER POLICIES FOR BETTER LIVES

This document is published under the responsibility of the Secretary-General of the OECD. It reproduces an OECD Legal Instrument and may contain additional material. The opinions expressed and arguments employed in the additional material do not necessarily reflect the official views of OECD Member countries.

This document, as well as any data and any map included herein, are without prejudice to the status of or sovereignty over any territory, to the delimitation of international frontiers and boundaries and to the name of any territory, city or area.

This document is provided free of charge. It may be reproduced and distributed free of charge without requiring any further permissions, as long as it is not altered in any way. It may not be sold.

This is an unofficial translation. Although best efforts have been exercised in order to ensure correspondence to the original texts, the only official versions are the English and French texts available on the OECD website https://legalinstruments.oecd.org.

Ce document est publié sous la responsabilité du Secrétaire général de l'OCDE. Il reproduit un instrument juridique de l'OCDE et peut contenir des informations complémentaires. Les opinions ou arguments exprimés dans ces informations complémentaires ne reflètent pas nécessairement les vues officielles des pays Membres de l'OCDE.

Ce document, ainsi que les données et cartes qu'il peut comprendre, sont sans préjudice du statut de tout territoire, de la souveraineté s'exerçant sur ce dernier, du tracé des frontières et limites internationales, et du nom de tout territoire, ville ou région.

Ce document est fourni gratuitement. Il peut être reproduit et distribué gratuitement sans autre autorisation, pour autant qu'il ne soit pas modifié de quelque manière que ce soit. Il ne peut être vendu.

Ceci est une traduction non officielle. Bien que tout ait été mis en œuvre pour assurer la correspondance avec les textes originaux, les seules versions officielles sont les textes français et anglais disponibles sur le site Internet de l'OCDE https://legalinstruments.oecd.org.

Sharciyadi waa tarjumaad aan rasmi ahayn oo asalkeeda laga soo minguuriyay luqad Ingiriis, taas oo ay daabacday Organisation for Economic Co-operation and Development (OECD). Daabacaaddan waxaa si madax-bannaan u tarjumay hay'adaha soo socda: Social Development Direct iyo Translators without Borders (turkumaanada aanxadka lahayn). Organisation for Economic Co-operation and Development (OECD) ma ansaxinayo, mas'uulna kama aha tayada iyo saxnaanta tarjumaaddan.

Gudida Horumarinta Kaalmada OECD (DAC),

Hadaad tixraacdo talo bixinta Golaha Sinnaanta Jinsiga ee Waxbarashada, Shaqada iyo Ganacsiga [OECD / LEGAL / 0398]; Talobixinta Golaha hormuudka Iskaashiga Horumarinta iyo Maareynta Khatarta Musuqmaasuqa [OECD / LEGAL / 0431]; Talo bixinta Golaha Sinaanta Jinsiga ee Nolosha Dadweynaha [OECD / LEGAL / 0418]; iyo Talo bixinta DAC ee Bani'aadamnimada

Horumarinta nabada ee nedxus (Nexus Development-Peace [OECD / SHARCIGA / 5019];)

Hadaad Tixraacdo DAC (Tidewater Water Statement) ee La Dagaalanka Ka-faa'iideysiga Galmada dhiigmiirashada iyo Xadgudubka Qeybaha Horumarinta iyo Bani'aadamnimada iyo Baaqa ay bixiyeen Whistler ee Kahortagga Ku-xadgudubka Galmada iyo Xadgudubka Caawinta Caalamiga ah ee ay gaysteen Wasiirada Horumarinta G7;

Hadaad Tixraacda, Ballanqaadyada ay sameeyeen deeq-bixiyeyaashu si loola tacaalo Galmada dhiig-miirashada iyo xadgudubka iyo dhibaataynta galmada ee waaxda Gargaarka Caalamiga ah ee lagu go, aamiyay Shirkii London 2018kii ee ahaa Badbaadinta (summit)

Hadaad Tixraacdo, aasaaskii ay bixiyeen agab caalami ah oo ku saabsan dhinacyada kala duwan ee sinnaanta jinsiga iyo xuquuqda aadanaha, gaar ahaan mabaadi'da ku xusan Baaqa Caalamiga ah ee Xuquuqda Aadanaha iyo qodobbada ku habboon ee Sharciga Caalamiga ah ee Bani'aadamnimada, oo ay ku jiraan heshiisyaada Geneva iyo borotokoolka; axdiga caalamiga ee xuquuqda madaniga iyo siyaasadeed; Axdiga Caalamiga ah ee Xuquuqda Dhaqaalaha, Bulshada iyo Dhaqanka; Heshiiska Qaramada Midoobay (UN) ee xuquuqda carruurta; Axdiga Qaramada Midoobay ee cirib-tirka dhammaan noocyada Takoorka ka dhanka ah Haweenka; Baaqa Qaramada Midoobay ee Cidhibtirka Tacadiyada ka dhanka ah Haweenka (A / RES / 48/104); Istaraatiijiyadda Guud ee Qaramada Midoobay ee Caawinta iyo Taakulaynta Dhibbanayaasha Ku-xadgudubka Galmada dhiigmiirashada iyo Xadgudubka ee ka timaada Shaqaalaha UN iyo Shaqaalaha la Xiriira (A / RES / 62/214) Borotokoolka UN-ka ee ku saabsan Eedeymaha ku-xadgudubka Galmadan dhiigmiirashada iyo Xadgudubka ee ku lug leh Hirgelinta Wada-hawlgalayaasha; Go'aanka Golaha Guud ee Qaramada Midoobay ee 2018 ee ku saabsan xoojinta dadaallada looga hortagayo loona ciribtirayo dhammaan noocyada rabshadaha ka dhanka ah haweenka iyo gabdhaha:

dhibaataynta galmada (A / RES / 73/148); iyo Golaha Yurub ee Cahdiga ka hortagga iyo la dagaallanka rabshadaha ka dhanka ah haweenka iyo rabshadaha qoyska een diintu Ogolayn.

Adigoo tixraacaya ballanqaadyada siyaasadeed ee  ay sameeyeen Hayadaha UN-ka, oo ay ku jiraan Ajendaha 2030 ee Hormarka  Waara; barnaamijkii waxqabadka ee 1994 shirkii caalamiga ahaa ee dadka iyo horumarka; Baaqii Beijing iyo Madal Waxqabadkii Shirkii Afaraad ee Qaramada Midoobay ee Haweenka iyo qoraaladii natiijada ee shirarkoodii dib u eegista;

Aqoonsiga in galmada dhiig-miirashada iyo ku-xadgudubka (SEA) iyo dhibaataynta galmada (SH) ay yihiin wax aan la aqbali karin isla markaana ka soo horjeedda xeerarka caalamiga ah ee lagu dabaqi karo iyo sharciga caalamiga ah iyo in SEA iyo SH ay ka dhigan yihiin dhaqan aan la aqbali karin oo leh saameyn waarta, argagax leh iyo tirtiridda shakhsiyaadka iyo bulshada iyo, halka oo ay gaystaan bixiyeyaasha gargaarka iyo la-hawlgalayaashoodu, waxay su'aal ka keeneysaa daacadnimada bulshada gargaarka caalamiga ah iyo kalsoonida gargaarka laftiisa;

Aqoonsiga  in halista  galmada dhiig-miirashada iyo ku-xadgudubka (SEA) iyo dhibaataynta galmada (SH) ay halis ugu jiraan wiiqida dadaallada caalamiga ah ee lagu doonayo in lagu gaaro Ajendaha 2030 ee Horumarka Waara, gaar ahaan Himilada Horumarka Joogtada ah (SDG) 5, “Gaaritaanka sinnaanta jinsiga iyo in la xoojiyo dhammaan haweenka iyo gabdhaha”;

Aqoonsiga in halista galmada dhiig-miirashada iyo ku-xadgudubka (SEA) iyo dhibaataynta galmada (SH) ay sii kordheyso markii deeq-bixiyeyaasha iyo la-hawlgalayaashoodu ay ku guuldareystaan dejinta dhaqamada iyo qawaaniinta ka hortagaya SEA iyo SH ama u dhaqmaan si firfircoon u maareeyaan una yareeyaan halista, oo ay ku jiraan khataraha ka sii dartay ee ka dhasha marka laga shaqeynayo xaaladaha jilicsan, khilaafka saameeyay bey'adaha ay isku dheelitir la'aanta awooda iyo sinaan la'aanta jinsiga ay si fudud u sii jiri karto;

Aqoonsiga in deeq-bixiyeyaasha iyo la-hawlgalayaashoodu u baahan yihiin inay xoojiyaan isku-duwidda iyo wada-jirka kahortagga iyo ka-jawaabista dhacdooyinka, galmada dhiig-miirashada iyo ku-xadgudubka (SEA) iyo dhibaataynta galmada SH, iyagoo sameeyay  meel ay deeqbixiyayaasha u  horseeda isbeddel dhaqameed iyo isla-xisaabtan; wax u qabashada dhibbanayaasha iyo kuwa ka badbaaday iyo wax ka qabashada ciqaab la'aanta; in la xoojiyo awooda qeybaha gargaarka; in la aqoonsado doorka muhiimka ah ee ururada xuquuqda haweenka iyo ururada ay haweenku hogaamiyaan ee ka hortagga iyo ka jawaabista rabshadaha ka dhanka ah haweenka iyo gabdhaha, iyo baahida loo qabo in la hubiyo kaalintooda dhexe ee dadaallada caalamiga ah iyo kuwa maxalliga ah ee looga hortagayo waxna looga qabanayo galmada dhiig-miirashada iyo ku-xadgudubka galmada SEA iyo SH; iyo in la waafajiyo heerarka caalamiga ah ee khuseeya si loo yareeyo suurtagalnimada iyo saameynta SEA iyo SH ee lagu fuliyay jilayaasha keenaya gargaarka caalamiga ah;

Aqoonsiga dadaallada UN-ka ee ka hortagga iyo ka waxka qabadka galmada dhiigmiirashada ah iyo ku xad gudubka galmada SEA iyo dhibaataynta galmada SH, oo ay ku jiraan Warbixinta Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay ee Tallaabooyinka Gaarka ah ee Kahortagga Isticmaalka Galmada iyo Xadgudubka

Galmada: Habka cusub (2017); Xog-hayaha Guud ee Qaramada Midoobay: Tallaabooyin gaar ah oo loogu talagalay ilaalinta dhiig-miirashada galmada iyo xadgudubka galmada (2003), Mamnuuca takoorista, dhibaataynta, oo ay ku jiraan dhibaateynta galmada, iyo ku takri-fal awoodeed (2008), iyo Ka-hortagga aargoosiga ka soo warbixinta anshax-xumada iyo wadashaqeynta si sharci ah loo idmay xisaabinta iyo baaritaanka (2017); Go'aannada Golaha Amniga ee Haweenka, Nabadda iyo Amniga, oo ay ku jiraan qaraar tirsigiisu ahaa 1325 (2000) iyo go'aammadii xigay ee illaa iyo ay ka mid yihiin qaraarkii 2242 (2015); Siyaasad Qaabeed ku saabsan Dhibaateynta Galmada (2018); iyo sidoo kale shaqada muhiimka ah ee uu qabtay Isuduwaha Gaarka ah ee Qaramada Midoobay ee ku saabsan hagaajinta jawaabta UN-ka ee SEA, u doodaha Xuquuqda Dhibanaha UN, Sanduuqa UN Trust ee dhibbanayaasha SEA, Is-xilqaan iskaashiga ah ee Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay iyo shaqsiyaadka Dowladaha Xubnaha ka ah. Hogaaminta kahortaga iyo jawaab celinta kufsiga iyo xadgudubka galmada ee howlaha qaramada midoobay, gudiga latalinta bulshada rayidka ee kahortaga dhiig-miirashada iyo xadgudubka galmada, iyo ajandaha Grand Bagain ee Bini'aadamka (2016); iyo Axdiga ku-darista Dadka Naafada ah ee Waxqabadyada Bani'aadamnimada (2016);

**Aqoonsiga** in Mabaadi'da Guddiga Joogtada ah ee Hay'adaha iyo Heerarka Ugu Yar ee Hawlgalka ee Kahortagga Ku-tagrifalka Galmada iyo Xadgudubka (MOS-PSEA), iyo Heerka Bani'aadamnimada Muhiimka ah ee Tayada iyo La Xisaabtanka (CHS), oo ah heerar muhiim ah oo caalami ah;

Waxaa muhiim ah Aqoonsiga in la dhexgeliyo hab badbaado oo dhibbane xudun u ah siyaasadaha PSEA iyo SH, iyadoo la waafajinayo afar mabaadi'da hagida ee ah: (i) badbaadada; (ii) sir haynta; (iii) ixtiraam; iyo (iv) takoor la aan lagu sharaxay Istaraatiijiyadda Guud ee Qaramada Midoobay ee Taakulaynta ,Dhibbanayaasha Ku-xadgudubka Galmada iyo Xadgudubka Shaqaalaha UN iyo Shaqaalaha La Xiriira (A / RES / 62/214), iyo sidoo kale in carruurta ka badbaaday ay u baahan yihiin fiiro gaar ah in la hubiyo nabadgelyadooda, ilaalinteeda, iyo wanaaggooda;

**Aqoonsiga** in SEA iyo SH ay ku qotomaan sinaan la'aanta qaabdhismeedka, gaar ahaan sinnaan la'aanta jinsiga, ee dhalisa rabshadaha ku saleysan jinsiga, noocyada kale ee rabshadaha, iyo takoorka;

**Aqoonsiga** SEA iyo SH ay noqon karaan ku tumasho ama ku xadgudub xuquuqda aadanaha, sidaas awgeedna horumarinta, ilaalinta, iyo xushmeynta xuquuqda aadamaha waa inay udub dhexaad u yihiin ka hortagga iyo la dagaallanka SEA iyo SH. Waxaa muhiim ah Hubinta hab ku saleysan xuquuqda aadanaha oo aan waxyeello u geysan iskaashiga horumarka iyo gargaarka bani'aadamnimada. Feejignaan gaar ah ayaa loo baahan yahay in la siiyo kooxaha nugul, oo ay ku jiraan haweenka iyo carruurta, iyo kuwa halista ugu jira takoor ku saleysan, naafonimo, aqoonsiga jinsiga iyo nooca galmada, jinsiyadda, isirka, da'da ama diinta;

I. Waxaan ku heshiinay, in ujeedada Talo-soo-jeedinta hadda jirta, qeexitaannada soo socda loo isticmaalo:

a. Hay'adda horumarinta caalamiga ah (sidoo kale loo yaqaan deeq-bixiye) waxaa loola jeedaa wasaaradaha dowladda ama hay'adaha kale ee dowliga ah ama kuwa gaarka loo leeyahay ee lagu aaminay mas'uuliyadda bixinta lacagaha dadweynaha ee lagu xisaabtamo inay yihiin Caawinta Horumarinta Rasmiga ah (ODA).

b. Hirgelinta waxaa loola jeedaa wasaaradaha dowladda ama hay'adaha kale ee bulshada, iyo sidoo kale la-hawlgalayaasha hay'adaha horumarinta caalamiga ah sida dowladaha soo koraya, hay'adaha dowladda oo ay ku jiraan maamullada maxalliga ah, ururada aan dowliga ahayn iyo kuwa bulshada rayidka ah, ururada shaqaalaha, horumarinta dhinacyada badan iyo hay'adaha gargaarka. , iyo alaab-qeybiyeyaasha badeecadaha iyo adeegyada ku lug leh fulinta mashaariicda gargaarka ama barnaamijyada ama ururada ganacsiga gaarka loo leeyahay ee qaata lacagaha gargaarka.

II. Waxaan ku heshiinay Ujeedada Talada DAC waa in la bixiyo qaab-dhismeed dhammaystiran oo taageeri kara, hagi kara, dhiirrigelin kara, caawin karana DAC iyo xubnaha aan DAC-da ahayn ee u hoggaansamay (hadda ka dib "Adherents") awooddooda deeq-bixiyeyaasha iyo daneeyayaasha bulshada caalamka si loo hirgaliyo talaabooyin dhameystiran, isku xirnaansho iyo iswaafajin, oo waafaqsan heerarka caalamiga ah ee lagu dabaqi karo iyo tixgalinta sharciyada qaranka, si looga hortago loona jawaabo SEA iyo SH howlahooda bixinta iyo / ama maamulka gargaarka. Tan waxaa ka mid ah in laga soo hormariyo badbaadayaasha iyo dhibbanayaasha, in la taageero isbedelka dhaqameed ee ururka, dhisida awooda, xoojinta la xisaabtanka, iyo xoojinta sharafta qeybaha gargaarka caalamiga.

III. Waxaa lagula taliyaa dadka raacsan inay dejiyaan ama dib u eegis ku sameeyaan iskaashigooda horumarineed iyo nidaamyada gargaarka bani'aadamnimada si loo xoojiyo ka hortagga iyo ka jawaabista SEA iyo SH, loo maareeyo halista, loona taageero loona ilaaliyo badbaadayaasha iyo dhibbanayaasha. Raacayaashu waa inay qaadaan tallaabooyin lagu hubinayo in nidaamyadan ay hirgeliyaan hay'adahooda horumarinta caalamiga ah iyo fulinta hawlgalayaasha dhammaan howlahooda ku saabsan bixinta iyo / ama maamulka gargaarka, iyadoo lagu saleynayo ilo ku filan. Dejinta ama dib u eegista nidaamyadan, iyo sida ugu habboon ee waajibaadka la xiriira, doorarka iyo mas'uuliyadaha, Raacayaashu waa inay:

1. **Horumarinta siyaasadaha iyo heerarka anshaxa xirfadeed lana raadiyo in lagu kobciyo isbeddelka ururka iyo hoggaaminta SEA iyo SH xagga bixinta gargaarka caalamiga ah**. Saameyntaan, Adherents waa inay, ahaata sida ku habboon:

a. Xooginta hagaajinta dhaqanka ururada iyo qawaaniinta iyada oo loo marayo hoggaan wax ku ool ah oo ku saleysan qiimeyn iyo hagitaan ku saabsan yoolalka, qiyamka, dabeecadaha, iyo rajooyinka la xiriira ka hortagga iyo ka jawaabista SEA iyo SH, oo ay ku jiraan kor u qaadista loo dhan yahay, takoor la'aanta, jawiga shaqada iyo fursadaha, oo ay ku jiraan iyada oo lagu dhiirrigeliyo shaqaalaysiinta iyo horumarinta xirfadaha haweenka ee hoggaanka sare iyo ururrada oo dhan.

b. Hubinta kaqeybgal heer sare ah iyo ballanqaadyo hoggaamineed si loo beddelo ama loo joogteeyo dhaqanka ururada wanaagsan iyo xeerarka la xiriira ka hortagga SEA iyo SH, iyada oo loo marayo wadahadallo heer sare ah oo joogto ah oo ku saabsan sida arrimahan wax looga qabanayo, iyo sidoo kale in la hubiyo awoodda abaabul ee heeganka lagu taageerayo iyo abaabulka shaqada SEA iyo SH, aqoonsashada iskuxirka xuquuqda aadanaha ballaaran iyo ballanqaadyada sinnaanta jinsiga.

c. In la sameeyo siyaasado, istiraatiijiyad, iyo qorshayaal shaqo oo loogu talagalay ka hortagga iyo ka jawaab celinta SEA iyo SH oo si wax ku ool ah loo hirgeliyo; in la dejiso yoolal iyo heerar; muujinaya qaab

isku xirnaan ah; iyo taageerida hirgelinta durdurrada shaqada ee la xiriira. Nidaamyadan, Adeegeyaashu waa inay caddeeyaan in ku guul darraysiga in si ku habboon looga jawaabo dhacdooyinka SEA iyo SH aan loo dulqaadan doonin, halka ka hortagga iyo waxqabadku ay ku saleysnaanayaan qaab u fiican qofka ka badbaaday iyo dhibbanah oo ujeedkeedu yahay inaan waxyeello la loo gaysan cidna.

d. Soosaar Xeerarka ku dhaqanka ama Heerarka Anshaxa ee bixiya heerar iyo qawaaniin cad oo lagaga hortagayo laguna dagaallamayo SEA iyo SH, iyadoo la hubinayo in si guud loo heli karo loona gudbiyo shaqaalaha iyo maamulka sare si joogto ah inta lagu jiro xilliyada shaqada ee muhiimka ah (oo ay ku jiraan shaqaalaysiinta iyo nidaamka anshax marinta), iyadoo loo diyaargaroobayo iyo inta lagu guda jiro hawlgallada, qaabdhismeedka maaraynta waxqabadka, iyo qiyamka hoggaaminta. Xeerarka noocan ah ee anshaxa iyo heerarka anshaxa waa in lala wadaago la-hawlgalayaasha fulinaya oo si firfircoon loogula socodsiiyaa luqadaha la xiriira iyo qaababka bulshada deegaanka halka ay khuseyso.

e. Diyaari hab-maamuus warbixineed iyo jawaab celin, oo leh tilmaamo cad oo shaqaalaha ku saabsan goorta iyo cidda loo tegayo, iyo sida looga jawaabo qaab qarsoodi ah, oo u wanaagsan qofka ka badbaaday -iyo kan dhibbanha ah-ujeedo. Shaqaaluhu waa inay ogaadaan waajibaadka saaran inay soo sheegaan dhacdooyinka SEA iyo SH, oo leh waqti go'an oo loogu talagalay jawaab celinta iyo habab dabagal ah, waana inay ogaadaan in siyaasad ka ilaalinaysa dhibanaha aargoosiga ay jirto, iyadoo la ogyahay in hababka la xisaabtanka ee la hagaajiyay ay horseedi karto warbixin dheeraad ah oo dhacdooyinka SEA iyo SH.

f. Ku dar heerarka, nidaamyada, shuruudaha, iyo / ama ballanqaadyada ku xiran dhammaan heshiisyada iskaashiga iyo qalabka maalgelinta (tusaale ahaan, qandaraasyada, deeqaha, xusuusta fahamka) oo ay weheliso daaweynta jebinta iyo shuruudaha warbixinta

2**. Horumarinta ama taageerida qaab-dhismeedka jawaab-celinta ka badbaadha iyo dhibbanaha.**
Farsamooyinkani waa inay:

a. waa inaad diyaarisaa habab ka hortaga iyo jawaab celintu ay tahay mid xudun u ah ka badbaadaha -iyo dhibanaha SEA iyo SH, halkaasoo badbaadayaasha iyo khibradaha dhibbanayaasha, xuquuqdooda, baahiyahooda, iyo rabitaankooda ay udub dhexaad u yihiin soo gudbinta, baaritaanka, iyo hababka jawaab celinta, iyo hubinta deeq bixiyaasha iyo hirgelinta wada-hawlgalayaashu waxay uga jawaabaan waqti ku habboon waxayna taageeraan oo ilaaliyaan badbaadayaasha iyo dhibbanayaasha inta hawshu socoto.

Habkani waa inuu tixgelin gaar ah siiyaa kooxaha nugul, oo ay ku jiraan haweenka iyo carruurta, iyo sidoo kale dadka halista ugu jira takoorka iyadoo lagu saleynayo, tusaale ahaan, naafonimo, aqoonsiga jinsiga iyo nooca galmada, jinsiyadda, qowmiyadda, da'da ama diinta. Habka badbaadaha-iyo dhibanaha-xudunta u ah waa in lagu saleeyaa ixtiraamka xuquuqda aadanaha, iyo sidoo kale ixtiraamka, sirta, amniga, iyo takoor la'aanta.

b. Ku dar noocyo kala duwan oo wax ku ool ah, oo fudud oo ka badbaadayaasha-iyo dhibanayaashuba ay heli karaan dhammaan xubnaha bulshada, oo leh shuruudo cad iyo hagitaan ku saabsan goorta iyo sida

farsamooyinka loo adeegsan karo, loona hubiyo isku xirnaanshaha ku habboon iyo taageerada gargaar ku haboon ka-badbaadayaasha 'iyo dhibbanayaasha' . Hababka cabashooyinka, oo ay ku jiraan bulshadu.

habab ku saleysan, waa in la soo saaro oo la hirgeliyo, oo la waafajiyo xaalado gaar ah oo maxalli iyo dhaqan ah, loona adeegsado wadashaqeynta hoggaanka maxalliga ah, hadii ay tahay mid nabdoon oo ku habboon, iyo illaa inta ugu macquulsan ee suurtogalka ah, in si wadajir ah loo taageero.

c. Diyaari jawaab isku dhafan oo nabadgelyo leh iyo ilaalinta kuwa soo sheega SEA iyo SH, oo ay ku jiraan ka badbaadayaasha iyo dhibbanayaasha, iyadoo lala kaashanayo daneeyayaasha ay khuseyso sida: Qaramada Midoobay; Ururada Bulshada Rayidka ah (CSOs) iyo ururada haweenka ee deegaanka; dawladaha hoose iyo qaranka halka ay ku habboon tahay; iyo hay'adaha dadweynaha oo ay ku jiraan mas'uuliyiinta maxalliga ah. Hawl wadayaahu waa inay horumariyaan hagitaan iyo heerarka ugu yar ee ka-badbaadayaasha iyo caawimaadda dhibbaneyaasha, hagaajinta, iyo taageerada, oo ay ku jiraan qaabaynta daneeyayaasha muhiimka ah iyo bixiyeyaasha adeegga gudbinta, iyagoo siinaya taago maaliyadeed oo loo baahan yahay oo si wadajir ah loo taageero illaa inta ugu macquulsan.

d. Raadi inaad xoojiso adeegyada maxalliga ah ee la helayo iyo shabakadaha iyo isku-dubbaridka rabshadaha ku saleysan jinsiga iyo adeegyada ilaalinta carruurta, sidoo kale si wax looga qabto tacadiyada ka dhanka ah gabdhaha, halka ay ku habboon tahay. Waa in lagu dadaalaa habka badbaadaha-iyo dhibanaha xudunta u ah si loo xoojiyo jawaabaha tacadiyada ku saleysan jinsiga iyo SEA iyo SH oo heer maxalli ah, oo ay ku jiraan xoojinta xukunka sharciga iyo helitaanka caddaaladda. Dadaalladu waa inay higsadaan inay horumariyaan tayada iyo helitaanka adeegyada gudbinta iyo qaababka ilaalinta si loo yareeyo halista badbaadaha iyo cambaareynta dhibanaha

3. In la sameeyo nidaamyada ka warbixinta iyo ka jawaabida ururada iyo habab looga hortago SEA iyo SH. Nidaamyadan waa inay ku jiraan:

a. Cabashooyinka gudaha iyo habraacyada baaritaanka ee ku saleysan macnaha guud ee ka badbaada- iyo dhibanaha xudunta u ah , oo ay ku jiraan howlo la dejiyay iyo habab lagu maareeyo dhacdooyinka iyo eedeymaha loogu talagalay deeq bixiyeyaasha iyo la-hawlgalayaasha fulinta. Kuwaashi waa inay baaraan habab madaxbannaan sida ugu habboon, iyagoo xusaya in kuwa la eedeynayo ay sidoo kale leeyihiin xuquuq u gaarka ah.

b. Waa in la heli karo habab warbixineed oo dhaqan ahaan ku habboon iyo farsamooyin cabasho oo qarsoodi ah, hababkaasi waa in ay ahaadaan habab fudud aamina ah, xaalada xasaasiga arinku yahay, iyada oo shakhsiyaadka iyo bulshooyinka ay saameeyeen ka warbixin karaan dhacdooyinka, iyo isku dubaridka si loo hubiyo joogtaynta dadaallada jawaab celinta. Kuwaan waxaa ka mid noqon Kara farsamooyinka warbixinaha madax-bannaan ee ay heli karaan shaqaalaha, la-hawlgalayaasha, dadka qaata gargaarka, iyo qoysaskooda iyo bulshada, iyo sidoo kale daneeyayaasha kale, ee ku lug leh dawladaha maxalliga ah iyo kuwa qaranka halka ay nabdoon tahay ee ay ku habboon tahay, iyo iyadoo la raacayo qaab-dhismeedkooda sharci iyo hay'adeed.

c.  Waxaa muhiim ah in la laga ilaaliyo aargoosiga kuwa ay saameeyeen ama soo sheega warbixinta, iyada oo laga yeelanayo siyaasad ka ilaalinaysa meesha  aargudashada .

d.   Waxa muhiim ku, ku dhaqanka sharciga, helitaanka cadaalada, taageerida awooda maxaliga ah iyo kororka isla xisaabtanka, iyadoo loo marayo iskaashiga horumarka iyo gargaarka bani'aadamnimada,  taasi waxay ku kuxiran tahay  xaalada deegaanka aad joogto.

e. Qaababka baaritaanka iyo habraacyada warbixinta  waa in ay ahaadaan kuwa hufan si loo hubiyo isla xisaabtanka gudaha iyo dibedda, ka hortagga taageerada, iyo hagaajinta marin u helka macluumaadka, iyadoo la tixgelinayo amniga, rabitaanka, baahida, iyo xuquuqda badbaadayaasha iyo dhibbanayaasha ee la xiriira wadaagista macluumaadka, sirta, ogolaanshaha , iyo qiimeynta halista, si loo badbaadiyo  kuwa ka badbaaday iyo dhibbanaha ah  iyadoo ujeedadu tahay in laga hortago dhacdooyinka mustaqbalka.

f. Siyaasadaha iyo geeddi-socodka si loo hubiyo labadaba farsamooyinka iyo mas'uuliyadaha maareynta si loo hubiyo in lala xisaabtamo shaqaalaha markii loo baahdo, oo ay ku jiraan cayrinta, ka joojinta, iyo tallaabooyinka kale ee maamulka. Isla mar ahaantaana, dhiirigelinno wanaagsan oo lagu dhiirrigeliyo ku-dhaqanka wanaagsan iyo abaalmarinta barashada iyo hagaajinta waa in loo adeegsadaa in lagu kobciyo dhaqanka ka mid noqoshada, kalsoonida, iyo furfurnaanta si ay awood ugu yeelato isla-xisaabtan iyo daah-furnaan.

g. Waa inay jiraan farsamooyin si cad loo ogaysiiyay oo lagula tacaalayo isla xisaabtan la'aanta, iyo ciqaabta shaqaalaha ku xad gudba xeerarka anshaxa.

h. Waa in ay jirtaa siyaasad cad oo ku saabsan shaqaalaysiinta, maaraynta shaqaalaha waxqabadkooda iyo dhaqammada gudbinta si looga hortago shaqaalaynta (tusaale ahaan, dib u shaqaalaynta, wareejinta, ama dallacsiinta) dambiilayaasha, oo ay ku jiraan habab hagaagsan oo lagu hubinayo asalka soo codsadayaash shaqada, tixraacyadooda, iyo diiwaangelinta dambiyada ee anshax xumo hore oo ay sameeyeen.

4**. Samee tababar, wacyigelin iyo xiriir ku saabsan ka hortagga SEA iyo SH. Tallaabooyinkani waxay u baahan yihiin kaydinta joogtada ah** waana inay ku jiraan:

a. Si kor loogu qaado wacyiga bulshada ee ku saabsan wax ka qabadka  SEA iyo SH, oo ay ku jiraan bixinta macluumaadka ku saabsan: sharciyada qaranka ee khuseeya, heerarka hay'adaha deeqaha bixiya, iyo xeerarka anshaxa; shuruudaha iyo dhaqanka laga filayo maamulka deeq-bixiyeyaasha, shaqaalaha, iyo la-hawlgalayaasha hirgelinta, oo ay ku jiraan kuwa gaarka loo leeyahay; iyo sida farsamooyinka cabashada loo isticmaali karo si looga warbixyo xadgudubyada.

b. Waa in la siiyaa tababar joogto ah iyo karti dhisid loogu talagalay maamulka iyo shaqaalaha kala duwan, xeerarka anshaxa, qaababka loo xareeyo cabashooyinka loona soo sheego anshax xumo, iyo saameynta xeerarka oo la jebiyo, oo ay ku jiraan siyaasadaha aargudashada, si loo hubiyo isbeddel dhaqameed wax ku ool ah loona dhiirrigeliyo ammaan, kalsooni, iyo jawi shaqo oo is ixtiraam leh Tababbarka iyo kobcinta awooda waa in ay ku xirnaadaan, ama la jaan qaadaan, tababarka kobcinta awooda. Meeshu suurtagal tahay, shaqooyinka loo cayimay ee kahortaga SEA iyo SH waa inay helaan tababar xirfadeed.

c. Si loo hubiyo in qaatayaasha gargaarka iyo dadka maxalliga ahi ay ka warqabaan xuquuqdooda, waa in la sameeyaa wacyi-gelin iyo dadaallo wacyiged, kahortagga wacyigelinta ama barnaamijyada lala kaashanayo la-hawlgalayaasha fulinta qaababka warbixinnada, iyo adeegyada taageerada ee la heli karo. Ka-faa'iideystayaasha gargaarka iyo dadka maxalliga ah waa in lagala tashadaa qaabeynta SEA iyo barnaamijyada wax loogaga qabanayoSH, si loo hubiyo in baahidooda la daboolay. Tan waxaa ka mid noqon kara dhisida awooda iyo tababarada ururada maxaliga ah, oo ay ku jiraan ururada xuquuqda haweenka, iyo shabakadaha iyo farsamooyinka ka hortagga SEA iyo SH. Agabyada waa in ay wadaagaan xarunta dhexe, xafiisyada shaqada, la-hawlgalayaasha fulinaya, iyo dowladaha hoose iyo kuwa heer qaran, iyo sidoo kale hay'adaha dowliga ah oo ay ku jiraan mas'uuliyiinta maxalliga ah, halka ay ku habboon yihiin; ee la xiriirta takoor la'aanta, si looga hortago loona ilaaliyo SEA iyo SH.

5. **Hubinta isu keenida caalamiga ah ee ka hortagga iyo ka jawaab celinta SEA iyo SH.** Saameyntan, Adherents waa inay:

a. Si loo dejiyo heerar iyo filashooyin cad waa in laysku laysku keenaa hayadaha caalamiga ah deeq bixiyaasha iyo la-hawlgalayaasha fulinaya, lana waafajiyo tallaabooyinka jira illaa inta suurtagal ah, ka jawaabidda baahiyaha ka badbaadayaasha iyo dhibbanayaasha, iyo in tallaabo dhammaystiran laga qaado ka hortagga iyo waxka qabadka SEA iyo SH.

b. Ku dar ballanqaadyada jira ee xubnaha DAC qaar ka mid ah oo saldhig u ah siyaasad ficil ku saabsan ka hortagga iyo waxka qabadka, oo ay ku jiraan Heerka Bani'aadamnimada ee Tayada iyo La Xisaabtanka (CHS), Guddiga Joogtada ah ee Hay'adaha Joogtada ah Heerarka Hawlgalka Ugu Yar (MOS-PSEA), OECD iyo DAC Talooyin, iyo ballanqaadyo kale oo caalami ah oo khuseeya, oo ay ku jiraan Ballanqaadyada ay sameeyeen deeq-bixiyeyaasha si wax looga qabto galmada dhiig-miirashada iyo xadgudubka iyo dhibaataynta galmada ee waaxda gargaarka caalamiga ah ee Shirka London ee Ilaalinta 2018.

c. Hubi iskaashi dhow iyo wadashaqeyn ka dhexeysa xubnaha DAC, la-hawlgalayaasha hirgelinta, iyo khubaro caalami ah iyo kuwa qaran oo ka hortagga iyo ka-hortagga SEA iyo SH; UN-ka, gaar ahaan Guddiga Joogtada ah ee Wakaaladdaha (IASC); iyo UN Executive Chief Executiveut Board Board for Coordination (CEB). Dadaallo gaar ah waa in la sameeyaa si loo waafajiyo heerarka ka-badbaadayaasha iyo taageeradooda, maareynta baaritaanka, iyo warbixinta ay soo gudbiyaan la-hawlgalayaasha fulinaya.

d. In la taageero horumarinta talaabooyinka si wada jir ahna loogu qiimeeyo waxqabadka ururada qaabka ay u wajahayaan SEA iyo SH, sida kuwa hada ay ku jiraan horumarinta Shabakada Qiimaynta Waxqabadka ee dhinacyada badan (MOPAN).

e. -Si loo xaqiijiyo himilooyinka talobixinta DAC iyo in la hubiyo in wada-hawlgalayaasha fulintu ay ilaalin karaan heerarka waa in Kheyraad heellan - oo ay ku jiraan maaliyad iyo shaqaale.

6. **Soosaar farsamooyin lagu kormeero, lagu qiimeeyo, laguna soo sheego SEA iyo SH ka hortagga iyo ka jawaab celinta. Saameyntan**, Adherents waa inay:

a. In la dejiyo habab lagula socdo oo dib loogu eego wax qabadka, taageerada, iyo dabagalka, sida horumar ka madaxbanaan iyo qiimeynta saameynta, ama qaababka dib u eegista ee ku saabsan dhaqamada ugu fiican iyo casharrada laga bartay, iyo qeexitaanno guud.

b. Xogta waa in la hagaajiyaa, oo la kala saaraa xogta lab iyo dheddig , tayo iyo tiro ahaan, iyo qiimeyn lagu sameeyo wakaaladaha iyo dadaallada la-hawlgalayaasha si loo xaqiijiyo sirta ka badbaadayaasha, dhibbanayaasha iyo kooxaha nugul. Dadaalladaan waxaa ka mid noqon kara xogta kala-soocidda si ay ugu awoodaan inay uga adeegsadaan ururada, goobaha, iyo waqtiga si ay u bartaan una ogaadaan isbeddellada u sheegi kara farqiga dhinacyada kale oo dhan.

IV. Xoghayaha Guud Waxaa lagu martiqaaday inuu faafiyo Talooyinkan DAC;

V. Raacayaasha waxa lagu martiqaadeyaa inay faafiyaan Talooyinkan DAC, gaar ahaan inta lagu guda jiro horumarkooda, hay'adaha samafalka, iyo nabad dhisida iyo la-hawlgalayaasha, iyo guud ahaan dowladda;

VI. Kuwa aan raacsanayn ku casuum inay xisaabtamaan oo ay u hogaansamaan Talooyinkan DAC;

VII. La-hawlgalayaasha aan dawliga ahayn ee khuseeya, qandaraasleyda, iyo deeq-bixiyeyaasha KU dhiirigelinta si ay u faafiyaan una raacaan Talooyinkan DAC;

VIII. Shabakadda DAC Waxay baraysaa  Sinnaanta Jinsiga:

a. Taageer gole daneeyayaal badan kaas oo Adherents, iyada oo loo marayo geedi socodka wadatashiga, la wadaago siyaasadaha, hababka ugu fiican, iyo habab hal abuur leh ee SEA iyo SH ka hortagga iyo ka jawaab celinta si loo taageero isbarashada iyo is waafajinta, loona sameeyo qalab loogu talagalay hirgelinta talo soo jeedintan DAC. ;

b. La soco oo wax ka baro hirgelinta talo soo jeedintan DAC, oo ay ku jirto habka DAC, iyo heshiisyada caalamiga ah ee khuseeya, sida kuwa haweenka, nabada iyo amniga, iyo soo saarista fursado loogu talagalay kormeer iyo dib u eegis badan, shanta sano ee ugu horeysa si loo suurtogeliyo loona taageero in wax laga barto la-qabsiga, iyo wadaagga hababka ugu wanaagsan si loo dhiso faham iyo karti;

c. Markaad isticmaashay barnaamijka DAC, shantii sanoba  mar ka warbixi ugu yaraana tobankii sanoba mar .

## Macluumaadka asalka

### Si Wada jir ah in wax looga qabto joojinta ka faa'iideysiga galmada, xadgudubka, iyo dhibaataynta

Talo soo jeedinta Guddiga Taakulaynta Horumarinta (DAC) ee saabsan Joojinta Ka-faa'iideysiga Galmada, Xadgudubka, iyo Dhibaateynta Iskaashiga Horumarinta iyo Gargaarka Bani'aadamnimada: Tiirarka Muhiimka ah ee Kahortagga iyo Waxqabadka waxaa la ansixiyay 12-kii July 2019.

Talobixinta DAC waa aaladdii ugu horreysay ee caalami ah ee ka talo bixiya faa'iideysiga galmada shiigmiirashada  iyo xadgudubka (SEA) iyo dhibaateynta galmada (SH) ee khuseysa iskaashiga horumarka iyo gargaarka bani'aadamnimada. Waxaa loo sameeyay talo bixintaasi iyada oo wax looga qabanayo warbixinnada dhibta leh ee galmada dhiig-miirashada iyo ku-xadgudubka iskaashiga horumarka iyo gargaarka bani'aadamnimada waxayna siisaa qaab-dhismeed dhammaystiran oo lagu taageerayo, laguna hagayo, lagu dhiirrigelinayo laguna caawinayo dawladaha - deeq-bixiyeyaasha awooddooda, dawladda

dhexe iyo daneeyayaasha bulshada caalamka si loo hirgeliyo tallaabooyin isku xirnaan iyo iswaafaqsan, iyadoo la raacayo heerarka caalamiga ah, si looga hortago loona jawaabo SEA iyo SH howlahooda ku saabsan bixinta iyo / ama maaraynta gargaarka, oo ay ku jiraan iyadoo la siinayo ka badbaadayaasha iyo dhibbanayaasha marka hore, taageeridda isbeddelka dhaqameed ee urur, dhisidda awoodda, xoojinta la xisaabtanka, iyo xoojinta daacadnimada waaxda gargaarka caalamiga ah.

Waxay ujeedadeedu tahay talobixinta DAC inay muujiso halbeeg sare si loo dhiso nidaam ku habboon oo looga hortagi karo loona waxna looga qaban karo SEA iyo SH waxaana lagu dhisay ilaa lix tiir: (i) Xeerarka, heerarka anshaxa xirfadeed, isbeddelka ururka iyo hoggaaminta; (ii) Waxqabadyada badbaadinta / dhibanaha xudunta u ah iyo farsamooyinka taakulaynta; (iii) Warbixinta ururada, hababka wax looga qabanayo dhibaatada iyo habraacyada; (iv) Tababar, wacyigelin iyo isgaarsiin ah; (v) Kawadashaqaynta Caalamiga ah; iyo (vi) Kormeerka, qiimeynta, barashada la wadaago iyo warbixinta.

Intaa waxaa dheer, Talobixinta DAC waxaa ka mid ah qodobbo loogu talagalay in lagu taageero xubnaha DAC iyo xubnaha aan DAC-da ahayn ee u hoggaansamay dadaalkooda ku aaddan hirgelinta ballanqaadyada ay ka kooban tahay, dejinta habab lagu sii wadayo barashada la wadaago, iyo kormeerka horumarka. Waxay u baahan doontaa maalgashi ku filan oo ku saabsan ilaha iyo cilmi baarista si loo dhiso mustaqbalka ugu wanaagsan ee caalamiga ah, iyada oo la tixgelinayo baahida loo qabo in wax laga qabto dheelitir la'aanta awoodda iyo sinnaan la'aanta jinsiga .

In kasta oo Talobixinta DAC aysan raadineynin inay si sax ah u qeexdo SEA iyo SH, ilo gaar ah ayaa laga yaabaa inay ku siiso hagitaan waxtar leh faafinta, tarjumaadda, iyo hirgelinta SEA iyo SH.

Tusaale ahaan, war-bixinno gaar ah oo uu soo saaray Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay - kuwaas oo khuseeya shaqaalaha UN-ka ujeeddadeeduna tahay ka-hortagga iyo wax ka qabashada kiisaska ku-takrifalka galmada dhiigmiirashada iyo xadgudubka galmada ee nidaamka UN - waxay ku saabsan yihiin " galmada dhiig-miirashada " iyo "xadgudubka galmada". Gaar ahaan, warsidaha ST / SGB / 2003/13 wuxuu sheegayaa in - galmada dhiigmiirashada macnaheedu tahay "wixii dhab ah ama isku day xadgudub ah oo ay geystaan shaqaalaha booska  sare jooga, kuwaas oo u isticmaalaya  awooda kaladuwan ama kalsoonida si ay uga faa iidaystaan sidii ay “galmo dhiigmirasho” “Ku-takrifal galmo" ugu samayn lahaayeen dadka nugul. Tusaale ahaan, weydiisasho jinsi macaamil ganacsi, iyo xiriirro  Galmo dhiig-miirad ah. Marka la eego "xadgudubka galmada", isla wargeysku wuxuu sheegayaa in ereyga "macnahiisu yahay faragelin jireed oo dhab ah ama hanjabaad ah oo ku saabsan dabeecadda galmada, ha ahaato xoog ama duruufo sinnaan ama qasab ah"

Marka laga hadlayo “dhibaataynta galmada”, Qaraarka Golaha guud ee qaramada midoobay 'xoojinta dadaalada looga hortagayo laguna tirtirayo dhamaan noocyada tacadiyada ka dhanka ah haweenka iyo gabdhaha: dhibaateynta galmada,' (A / RES / 73/148) wuxuu ku nuuxnuuxsaday in dhibaateynta galmada "ay ka kooban tahay dabeecadaha aan la aqbali karin iyo dhaqannada galmada gafka ah, laakiin aan ku xaddidnayn, soo jeedimaha galmada ama dalabyada, codsiyada ku saabsan soo jeedin galmado iyo dhaqanka galmada, hadal ama jir ahaaneed ama tilmaam, taas oo ah ama laga yaabo in si macquul ah loogu arko inay tahay xadgudub ama sharaf dhac . ”

Ugu dambeyntiina, halka ereyga "carruurta" loogu adeegsaday Talobixinta DAC, xubnaha DAC waxay tixgeliyeen Heshiiska Qaramada Midoobay ee Xuquuqda Carruurta, kaasoo qeexaya "carruurta" qof kasta oo ka yar 18 sano.

Nidaam loo wada dhan yahay oo lagu horumarinayo Talooyinka DAC

Bishii Juun 2018, DAC waxay aasaaseen Kooxda Tixraaca DAC ee PSEA, oo ay wada guddoominayeen wufuud ka kala timid Austria, Ireland iyo Boqortooyada Ingiriiska. Kooxdan waxaa ka mid ahaa, marka lagu daro wufuudda xubnaha ka ah DAC, wakiillo ka socda, iyo kuwo kale, Qaramada Midoobay iyo Guddiga Joogtada ah ee Wakaaladaha, Bangiga Adduunka, wakiillada shabakadaha bulshada rayidka ah, iyo waddamada xubnaha ka ah DAC.

Waxay si dhow ula shaqeeyeen kooxda Tixraacu Ururada Bulshada Rayidka ah (CSOs), iyada oo la waafajinayo Qaabdhismeedka DAC-CSO ee Kaqeybgalka, si ay gacan uga geysato hubinta in soo jeedinta DAC ay gacan ka geysaneyso xubnaha DAC iyo fulinta wada-hawlgalayaasha si ay ula jaan qaadaan ficilladooda ku aaddan kahortagga iyo ka-hortagga SHA iyo SH . Kooxda Tixraaca ayaa sidoo kale la shaqeysay macluumaad faahfaahsan oo ku saabsan dhaqamada xubnaha DAC ee ka hortagga iyo wax ka qabadka SEA iyo SH oo lagu soo ururiyey sahan qoto dheer oo loo diray xubnaha DAC 2018 kii.

## Kormeerka fulinta, faafinta iyo u hogaansanaanta

Shabakadda DAC ee Sinnaanta Jinsiga ayaa kormeeri doonta hirgelinta iyada oo loo marayo habka dib-u-eegista asaaga ah ee DAC, iyo sidoo kale in la horumariyo xulashooyin badan oo kormeer iyo dib-u-eegis ah shan sano gudahood laga bilaabo markii la qaatay soo-jeedinta DAC. GENDERNET wuxuu warbixin ka siin doonaa fulinta DAC ugu dambeyn shan sano ka dib qaadashadeeda iyo ugu yaraan tobankii sanaba mar